STATE OF MAINE
GOVERNOR'S OFFICE OF POLICY INNOVATION AND THE FUTURE
181 STATE HOUSE STATION
AUGUSTA, MAINE
04333-0181

# Hadalka Guddoomiyaha Gobolka Mills ee Ku Aadan Xaaladda Hawlgallada ICE ee Maine

**Augusta, MAINE —** Guddoomiyada Gobolka Janet Mills waxay soo saartay bayaankan ku saabsan xaaladda hawlgallada ICE ee Maine:

Ciribtirka la soo sheegay ee ICE ee 'hawlgalka la xoojiyey' ee Maine ma soo afjarayo xanuunka iyo dhibaatada ay u geysteen bulshooyinka ku nool guud ahaan goboleedkeena — dadka la argagax geliyey, hooyooyinka laga soocay carruurtooda, ganacsiyo la handaday, dhammaan waxaa gaystay dawladooda.

"Weli ma naqaano faahfaahinta muhiimka ah ee ku saabsan 200 qof oo ICE sheegtay inay xirtay, kuwaas oo badankood u muuqda inay si sharci ah halkan u joogaan, aan lahayn wax dambi ah, isla markaana aan ahayn 'kuwa ugu daran oo ugu xun.' Dadka Maine waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan aqoonsiga qof kasta oo halkaas laga qaaday, sababta sharci ee arrintaas loo sameeyay, meesha lagu hayo, iyo waxa ay tahay qorshaha dowladda federaalka ee ku saabsan iyaga.

"Hawlgalkaan iyo xeeladaha ay adeegsadaan wakiillada dowladda federaalka guud ahaan dalka — oo ay ku jirto dilka laba muwaadin oo Mareykan ah oo ka dhacay Minnesota — waxay u baahan yihiin isla-xisaabtan (mas'uuliyad qaadis) ka timaadda Kongareeska. Taasi waxay ka bilaabmaysaa in la eryo Kristi Noem — taasoo dhowr xildhibaan oo Jamhuuriyiin ah ay hadda ku baaqeen — iyo in Kongareeska uu diido biilka maalgelinta Waaxda Amniga Gudaha ilaa ay jiraan tallaabooyin mamnuucaya dhaqanka sharci darada ee ICE, dhaqamada halista ah iyo ku tumashada awoodda, kuwaas oo gebi ahaanba ka soo horjeeda habraacyada iyo heerarka wanaagsan ee hay'adaha sharciga. Ilaa iyo inta tallaabooyin iyo isbeddello dhab ah laga hirgelinayo, ma jiro gobol — oo ay ku jirto Maine — oo ka badbaadsan adeegsiga hay'adaha fulinta sharciga federaalka sida hub loo adeegsado muwaadiniintiisa, sida uu sameeyay Maamulka Trump."

"Waxaan aad ugu hanweynahay dadka Maine oo difaacay qiyamkeena oo taageeray kuwa ka cabsanaya inay guryahooda ka baxaan, iyo sidoo kale ganacsiyada yaryar ee u hiiliyay una halgamay ilaalinta xuquuqda shaqaalahooda iyo qoysaskooda."

Guddoomiyad Mills ayaa hogaaminaysay dagaalka ka dhanka ah Maamulka:

- Khudbadda xaaladda gobolka ee maalmo ka hor, Guddoomiyad Mills waxay tidhi: "Nalama cabsin doono. Nalama aamusin doono. Qof kasta oo ka baxsan hoolalkan, oo ay ku jiraan mas'uuliyiinta federaalka, waxaan leeyahay: haddii aad isku daydaan inaad waxyeelleysaan dadka Maine, waa inaad marka hore aniga i soo martaan."

- Guddoomiyad Millswaxay codsatay kulan ay la yeelanayso Donald Trump si ay uga dalbato in ICE ay ka baxdo Maine.

- Guddoomiyad Mills waxay ku baaqday in Kongereeska ay xilka ka qaadaan Xoghayaha Kristi Noem.

- Guddoomiyad Mills waxay ku dhiirrigelisay Aqalka sare in uu diido biilka maalgelinta Waaxda Amniga Gudaha ilaa ay jiraan tallaabooyin dhab ah oo lagu joojinayo dhaqanka sharci darada ee halista ah ee ICE .

- Guddoomiyad Mills waxay ku baaqday in Kongereeska la xaddido maalgelinta ICE ilaa ay joojiyaan xeeladahooda gardarada ah.